


Sida loo Diyaariyo Caanaha sajalka gareesan ee caruurta Caafimaadka Leh

Caanaha sajal gareesan waxay leeyihiin badqab marka si wanaagsan loo diyaariyo.

Wixii macluumaad ah oo kusaabsan go'aan qaadashada ku adaan sida aad u quudin karto cunugaaga kala hadal daryeel bixiyahaaga caafimaadka ama kalkaalasada caafimaadka dadwaynaha. Kafiiri Xaashida Tilmaanta #1 wixii kusaabsan macluumaadka muhiimka ah.



Dhaq gacmahaaga kuna dhac saabuun iyo biyo.

Diyaarso dhamaan qalabka quudida (Fiiri Xaashida Tilmaanta #2).



Dhaq caaga korkiisa ama koonteenarka caaga ah ee caanaha adoo ku dhaqaya biyo kulul iyo saabuun.

Kafiiri caaga waqtiga ugu danbeeya ee la isticmaali karo.


Urux caaga si wanaagsan kuna fur caaga lagu furo ee nadiifka ah.



Fiiri Xaashida Tilmaanta #2 sida loo nadiifiyo biyaha lagu sameenaayo caanaha.

Ka akhri qoraalka sida inta caano iyo biyo ee aad hal mar isticmaalayso.


Kushub oo cabir biyaha la nadiifiyey oo la qaboojiyey heerkulka qolka masaasada la nadiifiyay.



Cabir caano laeg wax hal mar la cabo.



Kudar oo cabir caano la quudan karo hal mar kuna shub masaasada la nadiifiyey.



Isticmaal qalabka nadiifka ah si aad ugu qaadid afka caaga, daboolka iyo daboolka masaasada.



Kudhuufi daboolka gacmahaaga. Iska ilaali inaad ku taabato gacmahaaga afka caaga.




masaasada.



Quudi cunugaaga si aad oga jawaabto calaamadaha gaajada (Firi Xaashida Tilmaanta #6).

Tuur caanaha uusan cunugaagu cabin kadib 2 saacadood.



Waa habka ugu badqabka wanaagsan inaad isticmaasho dhalo cusub. markasta oo aad cunugaaga quudinayso. haddii aad diyaarisay dhalo qandac ah/leh biyo kulul, kuqabooji masaasada isla markii galina biyo qaboow oo socda ama gali koonteenar leh biyo qaboow. Marka aad qaboojiso, gali talaagada isticmaalna 24 saacadood gudahood.

Caagaga caruurta ee caanaha oo furann waa in La daboolaa, lagaliyaa furinjiiyeer isla markliiba waxaana lagu kaydin karaa furinjiiyeerka muddo dhan 48 saacdood.

Macluumaadka kusaabsan sida iyo goorta aad quudinayso cunugaaga kafiiri:

- Boggaga 16-20 kujira buuga **ICaanaha Caruurta: Waxa aad Rabtid Inaad Ogaatid.**

- **Xaashida Tilmaanta #6.**

Caanaha caruurta dib waa celin karaa.

Macluumaadka dib u celinta waxaa laga helayaa webseeetka Caafimaadka Canada oo ah www.healthycanadians.gc.ca/recall-alert-rappel-avis/index-eng.php

